Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODE) iyo Waaxda Waxbarashada Hore yo Daryeelka (DELC) waxay hiigsanayaan in carruurta la siiyo bilow wanaagsan oo ah dhanka dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. Sanadkii 2022, waxay tijaabiyeen kulamo loo yaqaan "Wada hadalka Qoyska" si loo buuxiyo hadafakani. Qoysaska iyo barayaasha ayaa u kulma fool ka foolka ah si looga hadlo si ay carruurtooda dhigata dugsiga barbaarinta 'kindergartner' uga caawin lahaayeen in ay guuleystaan.

Sanadkii 2023, Miiska Jikada ee Oregon 'Oregon's Kitchen Table' (OKT) ayaa qabtay "Isku imaatinka Bulshada" si loo weydiiyo dadka sida ay ka dareemeen Wada hadalkii Qoyska ee ay ka qayb galeen. Warbixintani waxay dadka la wadaagaysaa waxaanu sameynay iyo wixii aan maqalnay.

## Ku saabsan Oregon's Kitchen Table

OKT waa qayb ka mid ah Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go'aan qaadashada dadweynaha. Waxaanu la hadalnaa dadka aan sida caadiga ah lagu darin go'aanadani. Waxaan dadka ka caawinaa in ay hadlaan arrimaha gobolka degaanka, iyo heerka goboleedka. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada. Waxaanan qiimeynaa fikradaha kala duwan iyo waayo-aragnimada dadku wax nooga sheegaan.

## Sida Aan Wax uga maqalnay Dadka

OKT waxay qabatay isku imaatinkani si ay u ogaato waxa dadku u arkeen Wada hadaladii Qoyska ee ay ka qayb galeen:

- Isku imaatinka Bulshada ee affar iyo labaatanaad. Kuwani waxay ahaayeen kulamada shakhsi ahaaneed oo qoysaska lagula yeeshay dugsiyo kala duwan.
- Saddex wada hadalo oo dhanka Zoom ah oo lala yeeshay shaqaalaha dugsiga oo ka socday dugsiyo kala duwan. • Saddex wareysi oo lala yeeshay qoysaska iyo barayaasha

Barayaal dhowr ayaa sidoo kale email ahaan ku soo diray jawaab celinta. Waxaan la hadalnay dad isugeyntooda dhan tahay 232.

## Waxa Aan Maqalnay

### Waxa dadku isku raaceen

Kulamadii Bulshada, dadku waxay wadaageen fikrado badan oo waxay ku raaceen oo kuwa kale isku raaceen.

Halkan waxaa ku qoran wixii aan ka maqalnay Wada hadaladii Qoyska:

- **Way wanaagsanayd in xiriir lala yeesho dadka oo wax la wada barto.**
  - Way u wanaagsanayd qoysaska iyo barayaasha in ay is bartaan horraantii sanad dugsiyeedka.
  - Qoysasku way jeclaysteen in ay ka hadlaan waxa carruurtoodu yihiin, sida ay wax u bartaan, iyo waxa ay uga baahan yihiin dugsiga.
  - Qoysas badan ayaa jeclaystay in ay wax ka ogaadaan dugsiga, macallinka, iyo fasalka horraantii sanad dugsiyeedka.
  - Macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiga ayaa jeclaystay in ay wax ka ogaadaan ardaydooda iyo qoysaska ardaydooda.
  - Barayaal iyo qoysas badan ayaa raba in ay marar badan ka kulmaan mawduucyada dugsiga.
  - Barayaasha iyo qoysas badan ayaa raba in ay marar badan ka kulmaan mawduucyada dugsiga.
- **Dadku waxay u baahan yihiin xiriir dheeraad ah iyo caawimaad luqaddeed.**
  - Qoysaska iyo barayaashu waxay rabaan macluumaad cad, dhammeystiran, oo degdeg ah oo ku saabsan Wada hadalka Qoyska.
  - Dadku waxay sheegeen in dhammaan xiriirada ku saabsan Wada hadalka Qoyska ay ahaadaan kuwo ah luqaddo badan.

    - Barayaasha iyo qoysasku waxay dareemayaan in shaqaalaha kale ee dugsiga ay ku caawin karaan Wada hadalka Qoyska. Shaqaaluhu waa in ay sidoo ku hadlaan luqaddo ay qoysasku doorbidayaan inta uu socdo kulankani.
    - Qoysaska qaarkood ayaa raba in Wada hadalka Qoyska ka hadlo caadooyinka dhaqan ee la leeyahay.
- **Dadku waxay rabaan in ay si fiican u fahmaan Wada hadalka Qoyska.**
    - Qoysas badan ayaa raba in ay ogaadaan waxa Wada hadalka Qoysku ka hadli doono.

      Waxay rabaan wakhti ay kaga fikiraan waxay oran doonaan.
    - Qoysaska iyo barayaasha ayaa isweydiiyay sababta Wada hadalka Qoysku wax uga weydiiyay waxa carruurtu la soo kulmeen ka hor dugsiga barbaarinta carruurta ‘kindergarten’.
    - Dad badan ayaa raba in ay ogaadaan sida uu gobolku u isticmaali doono macluumaadka laga helo Wada hadalka Qoyska.

### Waxa dadku isku khilaafeen

Dadku waxay ku kala aragti duwanaayeen waxyaabo dhowr ah. Aragtiyadan waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Qoysaska qaarkood ayaa raba su’aalo dheeraad oo ku saabsan tacliinta. Qoysaska kale waxay rabaan su'aalo badan oo ku saabsan sida caruurtoodu yihiin iyo sida ay wax u bartaan.
- Dadku waxay leeyihiin heerar kala duwan oo aaminaad oo ay ka qabaan dugsiyadooda iyo hay’adaha gobolka sida ODE iyo DELC. Dadka qaba kalsoonida ay ayaa sidoo kale ka digtoon Wada hadalka Qoyska.

## Fikradaha Dadku Wadaageen

Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah fikradaha dadku hayeen ee loogu talagalay ODE iyo DELC:

- Goor hore iyo si cad in barayaasha iyo qoysaska xiriir ugala sameeyaan Wada hadalka Qoyska.

- Dadka u sheegaan kala duwanaashaha u dhexeeya Wada hadalka Qoyska iyo kulamada kale ee dugsiga.
- Dugsiyada ka caawiyaan in ay wada xiriir la sameeyaan qoysaska.
- Ka fikiraan haddii Oregon u baahan tahay siyaasado cusub si dugsiyada loo siiyo waqti loogu talagalay Wada hadalka Qoyska.
- Dugsiyada siiyaan tusaalooyinka sida loo qabto jadwalka Wada hadalada Qoyska.

Iyada oo ku saleysan waxa dadku noo sheegay, waxaan kula talinaynaa dugsiyada in ay ka fikiraan fikradahani, sidoo kale:

- Ha haystaan dad ka socda shaqooyin kala duwan oo jooga dugsiga in ay qoysaska ku soo dhaweeyaan Wada hadalka Qoyska.
- Ha haystaan qoysaska ardayda hadda jirta oo caawiya qoysaska cusub ee jooga Wada hadalka Qoyska. Ha keenaan dad isku dhaqan iyo luqaddo ah.

Ugu dambeyntii, waxaan kula talinaynaa barayaasha sameeyay Wada hadalka Qoyska in ay hagaan kuwa aanan sameynin. In la wada shaqeeyo waxay Wada hadalka Qoyska ka dhigi doontaa hab faa'iido leh oo waaraya oo loogu talagalay qoysaska iyo barayaasha.

## Gunaanadka

Boqolaal ka tirsan barayaasha iyo qoysaska Oregon ayaa sheegay in ay taageeraan Wada hadalka Qoyska. Waxay qiimeeyaan barashada ardayga, dugsiga, iyo midba midka kale. Rajada ugu weyn waxay ahayd wada xiriir hore oo fudud oo ah luqaddo badan. Hadda qoysas iyo barayaal badan ayaa wax ka og Wada hadalka Qoyska. Dadkani reer Oregon waxay qayb ka noqon karaan caawimaada in dadka kale aqoon u yeeshaan Wada hadalka Qoyska.

“Waxaan is lahaa wuxuu ahaa barnaamij wanaagsan kaasi oo i siisay aragti la xiriirta taariikhda dugsiga ardaygayga ka hor bilawha dugsiga. Iyo sidoo kale rabitaanka/walaaca waalidka ee ku saabsan ilmahooda. Waxaan dareemay in ay caawiso(caawisay) dejinta sanad dugsiyeed guul leh.” - Macallin

“Taxaddar badan ayaa ka jira bulshadani. Dugsigeenu runtii si adag ayuu u shaqeeyay si uu u noqdo mid wax taageera si ay qoysasku u dareemaan in ay noo imaan karaan. Waxay noqon lahayd mid waxtar leh haddii ay xoogga saari lahaayeen in macluumaadka uu yahay mid qarsoodi ah laakiin waxaa loo isticmaali doonaa in lagu caawiyo ardaygaaga. Kaliya la sii wado dhisida kalsoonidaasi.” – Xubin ka tirsan qoys

“Way wanaagsanayn in qof igala hadlo wax farxad u keenta ilmahayga iyo in ilmahaygu uusan ahayn kaliya tiro kale oo ka tirsan fasalka. Taasi waa muhiim, gaar ahaan aadista dugsiga barbaarinta carruurta ‘kindergarten’, waxayna noqon kartaa mid argagax u keenta ilmaha yar.” – Xubin ka tirsan qoys

“Qaar ka mid ah su’aalaha ayaa kuwo shakhsi ahaaneed. Maxay ku sameyn doonaan macluumaadkan? Ma hubo sababta ay ugu baahnayd in ay ogaato macluumaadkan loogu talagalay fasalka. Waxay u ekayd in ay xog ururin ku jireen manan hubo waxa loo isticmaalayo.” – Xubin ka tirsan qoys

“Marka aan maqlo “Kaalay oo la kulan macallinka,” waxaan ka fikiraa in aan imaanayo fasalkiisa oo wax ka ogaanayo isaga, ma aha cakiskeeda. Waa in ay kala caddeeyaan in kani uu noqon doono wada hadal ku saabsan ilmaha, qoyskiisa, iwm., – Xubin ka tirsan qoys

“Me gusta que la maestra es latina, y me puedo conectar con ella. Entiende como yo le enseño a mi hijo en la casa, y entiende la cultura y lo trae a la clase. “/ “Waan jeclahay macallimadaasi waa Latina, xiriir dhow ayaanan yeelan kartaa iyada. Way fahantay sida aan wiilkayga wax ugu baro guriga, fahamsan tahay dhaqanka, una keeno fasalka.” – Xubin ka tirsan qoys